

# Waa warbixin loogu talagalay qofka adigoo kale ah oo ubadkiisa lagu

2020-12-11

## Dardaarankaan wuxuu khuseeyaa haddii qof qoyska ka tirsan u cudurka [Covid-19] ku dhaco

Waan idin salaamay!

Hay'adda arrimaha caafimaadka dadwaynaha [Folkhälsomyndigheten] waxay cusbonisiisay nidaamyada xiriir la leh ilmaha iyo ardayda oo ah haddii qof qoyskooda ka tirsan u ku dhaco cudurka [Covid-19].

Haddii qof qoyska ka tirsan la xaqiijiyo in uu ku dhacay cudurka [Covid-19] waa in ilmaha iyo ardayda aynan aadin dugsiga xannaanadda ama iskuulka. Taasoo macnaheedu ay tahay in haddii qof qoyska ka tirsan la xaqiijiyo in uu ku dhacay cudurka [Covid-19] in ilmaha iyo ardayda, ay guryahooda iska joogaan xitaa haddii aynan lahayn calaamadaha cudurka. Ha ahaadeen ilmaha yaryar ee lagu xannaanadeeyo/dhigta dugsiga xannaanadda, dugsiyada biloowga/hoose/dhexe, goobaha wakhtilummiska, dugsiyada biloowga/hoose/dhexe ee gaarka ah iyo kuwa waawayn ee dhigta dugsiyada sare.

Barta internetka 1177.se waxaad ka aqrisan kartaa hab-dhaqamada ka hirgaleen Gobolka Östergötland, ku saabsan karantiil/faquuq iyo muddada guriga la joogo haddii qofku lagu xaqiijiyo cudurka [Covid-19] u ku dhacay ama u leeyahay calaamadaha cudurka [Covid-19].

[1177.se – ilaa intee ayaan guriga iska joogaa?](#)

Barta internetka ee Hay'adda arrimaha caafimaadka dadwaynaha [Folkhälsomyndigheten] waxaad ka aqrisan kartaa warbixin dheeraad oo ku saabsan nidaamyada wax laga bedelay.

[Warbixinta Hay'adda arrimaha caafimaadka dadwaynaha \[Folkhälsomyndigheten\] – ilmaha aan calaamadaha cudurka lahayn waa in guryahooda iska joogaan haddii qof qoyskooda ka tirsan u cudurka \[Covid-19\] ku dhaco](#)

Waad ku mahadsan tahay maadaama aad tixraacdo dardaaranka iyo talo-siinta guud ee Hay'adda arrimaha caafimaadka dadwaynaha [Folkhälsomyndigheten], kuwaasoo ulajeeddadooda tahay in la ciribtiro faafinta fayruuska!

Salaan diiran  
Xafiiska waxbarashada